Victims Information

# Dadka uu saameeyey dilka

## DHEX SOCDA NIDAAMKA CADAALADA DENBIILAHA WAXA DHACO IYO SIDA LOO HELO TAAGEERADA

Warqaddan xogtu waxay sharaxdaa taageerada aad heli kartid iyo qofka aad weydiin kartid caawin haddii uu ku saameysay dil.

In aad ku waydo qof aad u jeclayd dil waa waayo aragnimo xanuun leh. Taageradu waxay kaa caawin kartaa adiga iyo qoyskaaga iyo whānau la macaamil saameynta dambiga. Waa muhiim in aad ogaatid taageerada adiga kugu habboon. Waxaa jira hay'ado aagaada ah oo ku siin karo khabiirka dareenka iyo taageero wax ku ool ah. Soo wac Khadka Macluuumaakda Dhibanayaasha 0800 650 654 si aad u ogaato hay'adaha kuu dhaw.

*Fadlan eeg dhammaadka warqaddan xogta ah ee xiriirada ugu muhiimsan iyo* qaamuuska*.*

### Xuquuqda dhibanaha

Waxaad xaq uleedahay in laguu sheego adeegyada ku caawin karo, in la joogteeyo wargelinta horumarka dacwada ilaa maxkamadda iyo in aad ogaatid waxa la filanayo goortii aad maxkamadda aadid.

Waxaad xaq u leedahay in aad u sheegtid maxkamadda sida dambiga uu kuu saameeyay. Hadii aad tahay dhibanaha dambiga canug ama qof yar, waxaad xaq u leedahay in aad ka soo qeybgashid shirka kooxda qoyska iyo in aad dhahdid waxa aad jeclaan laheyd in aad aragtid in ay dhacaan.

Xaaladaha qaar, adiga ama wakiilkaaga wuxuu xaq uleeyahay in uu hadal ka dhaho waxyaabaha sida magaca xakameynta, damaanada, xabsiga guriga ama cafiska.

Waxaad ka filan kartaa edeb, naxariis iyo adeegyo ixtiraam leh saraakiisha maxkamadda, booliska iyo qof walboo kale oo kulug leh dacwada. Waxaad xaq u leedaahay arimaha gaarka ah.

Akhri Xeerka Dhibanaha oo warbixinta dheeraadka ah ee ku saabsan xaquuqdaada iyo daaweynta aad fillan kartid. Waxay ku jirtaa websaydkeena ee victimsinfo.govt.nz oo ay weheliso xoga kale oo waxtar leh.

Haddii aad u maleysay in aan xaquuqdaada la buuxin, ama aadan helin heerka adeegyada aad filaneysid, waxaad sameyn kartaa cabasho. Booqo victimsinfo.govt.nz ama soo wac Khadka Macluuumaakda Dhibanayaasha 0800 650 654.

### Baaritaanka

Baaritaanka dilku aad bay ugu adag tahay qoyska iyo saaxiibada dhibanaha. Haddii qof ka mid ah qoyskaaga ama whānau uu ahaa dhibanaha dil, helida taageerada saxa ah aad ayay muhiim u tahay.

Booliska ayaa u xilsaari doona qoyskaaga sarkaalka isku-xirka dhibanaha. Sarkaalkan ayaa hubin doona inaad og tahay waxa dhacaya ilaa inta lagu jiro baaritaanka iyo dacwada maxkamadda. Waxaa sidoo kale usuurtogaleysa in ay ka jawaabaan su'aalo walba oo aad qabtid oo waxay kula xiriirsiinayaan hay'adaha taageerada gaarka ah.

Inkastoo ay aad ugu adag tahay qoyska, qofka dhintay laga yaabaa in loo baahdo in uu yaalo goobta ilaa iyo inta caddaynta la ururinayo. Dhakhtar khabiir ah, oo loo yaqaan takhasusaha barashada cilmiga cudurada, ayaa sidoo kale sameyn doona baaritaan. Tani waa in la ururiyo caddaynta muhiimka u ah dacwada maxkamarda.

Baaritaanka dilku waxaa suura gala in ay qaadato waqti dheer. Booliska waxay u baahan yihiin in ay muujiyaan waxaa dhacay, cida ka masuulka aheyd iyo waxa ay ujeedadoodu aheyd. Sarkaalkaaga booliska isku xiraha dhibanaha ayaa soo wargelinaya qoyskaaga oo ku caawinaya inta aad diyaarsaneysid aaska ama tangi, iyo sameynta abaabulada kale.

Xilliga lagu jiro baaritaanka, booliska ayaa waraysan doona qoyskaaga, iyo dadka kale, sidoo kale sida isku keenista caddaynta sida sawirada iyo tijaabooyinka baaritaanka. Haddii booliska hayo caddeyn ku fillan, waxay xirayaan qofka iyo ku oogayaan xadgudub dambi ah.

#### DAMAANADA

Marka la xiro qof, waxaa laga yaabaa in la sii daayo ilaa ay maxkamadda ka aadaan. Tan waxaa lagu magacaabaa - damiin. Mararka qaar waxaa jiro xaalado ku saabsan halka qof uu ku noolaanayo iyo laga yaabo in ay qabaan bandow. Haddii booliska u maleeyo in adiga ama dad kale oo bulshadda ka mid ah ay halis ku jiraan, qofka laga yaabo in xabsi lagu hayo ilaa ay maxkamada ka yimaadaan, marka ay codsan karaan damiin mar kale ah.

Waxaad yeelan doontaa fursad aad kaga dhiibato fikirkaaga ku saabsan ku siidaynta qofka damiin. Waxaad sidoo kale dooran kartaa in aad qeyb ka noqotid diiwaanka wargelinta dhibaha si lagula soo socodsiiyo waxa ku dhaco dambiilaha markii la xukumo ka dib. Faahfaahintaada way dhawrsanaan doontaa. Waxaad dooran kartaa qof in uu qabto xogtan, haddii aad jeceshahay.

#### WARBIXINTA SAAMAYNTA DHIBANAHA

Waxaa lagu weydiinayaa haddii aad rabtid inaad samayso warbixinta saameeynta dhibanaha. Tani waxay maxkamadda u sheegeysaa sida dambiga uu kuu saameeyay adiga iyo qoyskaaga iyo whānau. Xafiiska sarkaalka booliska dhibanahaaga, Taageerada Dhibanaha ama hay'ada taageerada kale ayaa kugu caawin kara qorida warbixintan. Arag wax badan oo ku saabsan warbixintaada saameynta dhibanaha sida waafaqsan go'aanka maxkamadda iyo xukunka.

## Taageerada

Waxaa jira adeegyo taageero kala duwan oo aad heli kartid in ay ku caawinayaan.

#### TAAGEERADA DHIBANAHA ADEEGA TAAGEERADA DILKA

Kani waa adeega khabiirka si ay kaaga cawiso adiga iyo qoyskaaga iyo whānau oo dhinaca qayb kasta oo nidaamka, oo ay ku jirto marka ay dacwadu dhammaato. Waxay xaqiijin doontaa in aad heli karto taageerada caafidadeed ee aad u baahan tahay, iyo taageero la qaban karo ee xaqa aad u leedahay. Booliska ayaa kugu xiri doona adeegaan ama waxaad kala xiriiri kartaa Taageerada Dhibanaha 0800 842 846.

#### TAAGEERADA LATALINTA KHABIIRKA

Qoyska iyo saaxiibada dhibanayaasha dilka, markhaatiyada iyo dadka ahaa kuwii joogay goobta dilka ayaa heli kara ilaa 30 kulan oo ah latalinta khabiirka ah. La xiriir Taageerada Dhibanaha si aad u ogaatid haddii aad qaadan kartid la talintaan khabiirka iyo sida loo codsado.

#### DENBIYADA DHALINYARADA

Haddii denbiga uu sameeyo qof ka yar 17 sanno jir arrinka waxaa loola tacaalayaa iyadoo la raacayo nidaamka cadaalada dhalinyarada. Dhibanayaasha waa qeyb wayn oo muhiim u ah nidaamka cadaalada dhalinyarada oo waxaad leedahay xaqa aad uga soo qeybgashid shirka kooxda qoyska.

illo kala duwan ayaa laga heli karaa Canuga, Dhalinyarada iyo Qoyska (CYF) iyo maxkamaddaha oo ku saabsan nidaamka cadaalada dhalinyarada. Isu duwaha kooxda qoyska ee ka yimid CYF ayaa kula soo xiriiraya.

#### TAAGEERO LACAGEED

Deeqaha dhaqaalo waxaa loo heli karaa in ay kugu caawiyaan in ay kaa daaboolaan qaar ka mid ah qarashka la xiriiro dambiga. Si aad u hubisid haddii aad heli kartid deeqda, iyo si aad u ogaatid sida loo codsado, kala xiriir Taageerada Dhibanaha 0800 842 846.

- Ilaa $5000 ayaa la heli karaa si loo yareeyo saameynta dilka oo qoyska ugu dhow ah. Caawinta waxay daboolaysaa dakhli lumista iyo kharashaadka guud.
- Deeq ah $124 maalintii ($64 maalintii barkeeda) ayaa loo heli karaa ilaa shan xubnood oo dadka weyn ee qoyska ah oo ka qeybgala dhageysiga Maxkamada Sare.
- Taageero dhaqaale ayaa loo heli karaa safarka, hoyga iyo adeegyada la xiriiro oo ilaa iyo lix qof oo ka qeybgalaya maxkamada iyo dhageysiyada Guddiga Cafiska.
- Ilaa $10,000 ayaa loo heli karaa si loogu caawiyo qarashyada aaska. La xiriir ACC si aad u codsato deeqdan.

Waxaad sidoo kale awood u yeelanaysaa in aad ka heshid taageero dhaqaale oo kale ACC. Waydii hay'ada taageerada si aad u ogaatid wax badan, ama ka wac ACC Khadka-caawinta sheegashada 0800 101 996.

## Maxkamadda

Eedeysanaha (qofka dambiga lagu soo eedeeyay) waxaa laga yaabaa in uu Maxkamadda ka hor yimaado dhawr jeer, tusaale ahaan in uu qirto in uu yahay denbiile ama mid aan denbi qabin ama in garsooraha uu eego caddaynta dacwada. Suurogal maaha inaad timaado dhegaysiyada oo dhan, laakiin waad tagi kartaa haddii aad jeceshahay.

Haddii eedeysanaha aanu qiran dambiga, dacwad oogahu ayaa usoo jeedin doona dacwada garsooraha iyo xeer-beegtiga. Dacwad oogaha waxa uu u shaqeeya dawladda oo waxa uu ka masuulyahay oogista dacwadaha isa goo ku metalaya Dacwad oogaha gobolka, booliska iyo dadweynaha. Waxaad laga yaabaa in aad u baahato in aad markhaati u noqotid Dacwad oogaha si aad ugu caawisid caddeynta dacwada ka soo horjeeda eedeysanaha (fiiri *Marqaati noqoshada*).

Dacwad oogaha ayaa kula kulmayo adiga iyo qoyskaaga iyo whānau oo kuu sheegayo waxa ay yihiin dacwadaha la soo oogayo iyo sababtee, iyo maxay kula tahay in ay maxkamadda ka dhacdo. Waxay ku xirantahay xaaladaha dacwada, eedeynta dilka ama dilka ula kaca. Dacwad oogahu wuuu kuu sharaxayaa midan adiga.

Maxkamadda waxaa laga yaabaa in ay soo saarto amar iyagoo ka hortagayo qofwalba oo daabacaya magaca dhibanaha ama faahfaahin kasta oo laga yaabo in ay aqoonsato dhibanaha. Dacwad oogahu ayaa kuu sharaxayo adiga nidaamkan.

U sheeg la taliyaha dhibanahaa maxkamadaada, sarkaalka booliska isku xiraha dhibanaha ama shaqaalaha taageerka gaarka ah haddii aad u baahantahay caawinta dhageysiga, dhaqdhaqaaqa ama ku caawinta fasiraada luuqada oo maxkamada ah.

Amnigaagu waa muhiim Haddii waqti walba aad ka walaacsantahay amnigaada maxkamadda ah, la hadal sarkaal booliska ama sarkaalka amniga.

Mararka qaarkood saxaafada ayaa dana gaara ka leh dacwada oo kuu soo dhowaata adiga iyo qoyskaaga iyo whānau si ay uga faalooto. Sarkaalka isku–xirka booliska iyo dhibanaha ayaa kaa siin doona talo sida loola macaamilo saxaafada.

### LATALIYAHA DHIBANAHA MAXKAMADDA

Marka eedeysanaha uu horyimaado maxkamada markii ugu horeysay, la taliyaha dhibanaha maxkamadda ayaa kula soo xiriiraya. Waa shaqadooda in ay kugu wargeliyaan horumarka dacwadaada iyo qeybta aad ciyaari kartid. Waxay sidoo kale kuu sheegi karaan meesha laga helo taagero dhaqaale iyo taageera niyadeed. Buugga adeegyada Maxkamadda ee dhibanayaasha wuxuu leeyahay xog badan oo ku saabsan adeegyada.

Lataliyaha dhibanaha maxkamaddaada, sarkaalka isku xirka booliska dhibanaha ama taageerada shaqaalaha gaarka ah waxay meesha u joogaan in ay sharaxaan wax walba oo aan caddeyn.

Waad ula xiriiri kartaa si toos ah lataliyahaaga dhibanaha maxkamadda ama adoo u sii maraya Khadka Macluuumaakda Dhibanayaasha 0800 650 654.

## Marqaati noqoshada

Xilliga xukunka, adiga iyo xubnaha qoyskaaga iyo whānau ayaa laga yaaba in loogu yeero markhaati ahaan. In markhaati lanoqdo waxay noqon kartaa waayo aragnimo walbahaar badan. Dacwad oogaha iyo Lataliyaha dhibnaha maxkamadda ayaa sharaxi kara waxa ku lug leh iyo waxa la filanayo. Waxaad ka heli kartaa caawin sarkaalka isku xiraha dhibanaha iyo booliska.

### MAXKAMADDA KA HOR

Sarkaalkaaga isku xiraha dhibnaha iyo booliska ama Lataliyaha dhibnaha maxkamadda ayaa kuu sheegi doona xilliga iyo goobta lagaaga baahan doono maxkamadda. Sidoo kale waxaad heli doontaa ogaysiis rasmiya oo laguugu keeno gurriga.

Dacwad oogaha ayaa kaala hadlaya waxa aad u baahantahay in aad u sameysid sida markhaati. Waxaad sidoo kale codsan kartaa inaad booqato qolka dhegaysiga dacwada waqti kahor. La hadal la taliyahaaga dhibanaha maxkamadda, sarkaalka dhibanaha booliska ama shaqaalaha taageerada si loo abaabulo middan.

La hadal la taliyaha dhibaha maxkamadaada ama sarkaalka xiriiriyaha booliska dhibaha haddii aad rabtid in aad abaabusho.

- qof kugula kulmo maxkamadda ama bannaanka maxkamadda
- qof taageere ah oo kula fariista marka aad cadeynta dhiibeysid.

#### MAXKAMADDA

Markhaati ahaan, waxaa lagu waydiin doonaa su'aalo ku saabsan waxa dhacay ama waxaad ka og tahay denbiga.

Markaad caddeyn bixineysid, waxaa caadi ahaan kuu suurtogaleysa in aad aragtid eedeysanaha.

Maxkamaddaha badankooda, waxaa jira goobaha sugitaanka dadka lagu magacaabo markhaatiyaasha, laakiin waxaa suura gala inaad weli arki kartid qoyska eedeysanaha iyo saaxiiibada ku dhex jiro iyo agagaarka maxkamadda.

Waa muhiim inaad hesho taageero marka aad tahay markhaati labadoodaba kahor, iyo maalintaba. La hadal lataliyaha dhibanaha maxkamadda ama shaqaalaha taageerada helida taageerada adiga kugu habboon.

## Go'aanka maxkamadda iyo xukunka

Dhammaadkka maxkamadda, eedeysanaha waxaa lagu helayaa dambi ama dambi la'aan. Mararka qaar maxkamada waxaa laga yaabaa in aysan ku helin eedeysanaha dambi taas oo sabab u ah waali uu qofka qabo.

Dacwadaha qaarkood, sida marka xeer beegtigu ma gaaran go'aan, waxaa laga yaaba inay jirto dacwad kale.

Haddii qofka uu qirto denbi, waxaa la xukumi karaa taariikh danbe. Sarkaalkaaga isku xiraha dhibanaha, iyo booliska, Lataliyaha dhibnaha maxkamadda ama dacwad oogaha ayaa kuu sheegi doona marka xukunku dhacayo.

Hadii eedeysanaha aan lagu heli dambi sabab waali ah waxaa laga yaabaa in lageeyo daaweyn oo xarunta caafimaadka maskaxda oo ilaashan. Isu duwaha dhibanaha ee xarunta ayaa kula soo xiriiraya si uu kuugu sharaxo waxa middan ay tahay.

#### XUKUMIDA

Garsooraha waxaa sharci ahaan laga rabaa in uu tixgeliyo arrimo badan marka uu xukumayo dambiilaha, sida xukunkee la siiyay oo dambiga kale la mid ah iyo warbixinaha ku saabsan dambiilaha.

Haddii uu garsooraha aqbalo, (ama qof kale aad dooratay) ayaa kuu akhrin kara dhammaan ama qayb warbixintaada saamaynta dhibanaha ee maxkamadda dhageysiga xukunka. Weydii lataliyaha dhibanaha maxkamaddaada ama sarkaal booliska isku xirka dhibanaha si uu kuugu weydiiyo garsooraha. Garsooraha waxaa laga rabaa in uu ka fiirsado warbixinta saameynta dhibanahaaga marka la xukumayo dambiilaha.

#### RAFCAANADA

Dacwad oogaha iyo xad gudbuhuba waxay xaq u leeyihiin in ay rafcaan ka qaataan go'aanka maxkmaddeed iyo xukunka. Tan macnaheedu waa in maxkamadda sare ay eegi doonta dacwada mar kale. Haddii tani ay dhacdo, dacwad oogaha ayaa kula socodsiinaya nidaamka.

## Maxkamada kadib

Marka lagu helo dambi, eedeysanaha waa la xukumayaa. Fahamka xukunku maaha mid inta badan sahlan. Sarkaalkaaga isku xiraha dhibnaha iyo booliska ama Lataliyaha dhibnaha maxkamada ayaa sharaxi kara waxa xukunka micnihiisu yahay.

#### KA SIIDEYNTA XABSIGA

Dambiilayaasha waxaa looga soo daayaa maxkamadda midkood cafis ama marka uu xukunkooda dhammaado. Tani waxay noqon kartaa mid ka horeysa inta aad filaneysid, sababtoo ah waqtiga ay ku qaataan xabsiga inta aanan dembiga lagu helin ka hor iyo xukunka waxaa loo xisaabinayaa sida qeyb ka ah xukunkooda.

Haddii xukun dambiilaha dhammaado, waa in laga soo daayaa xabsiga. Laguma hayn karo xabsiga xukunkooda markuu dhammaado kadib.

Dambiilaha waxaa laga soo deyn karaa xabsiga inta aysan dhammaanin xukunkooda haddii cafis la siiyo. Guddiga cafiska New Zealand ayaa eegayo dacwada dambiilayaasha badankooda oo go'aaminaya haddii siideynta hore ee dambiilaha ay u keeneyso haliso aan cudur daar lahayn amniga bulshadda.

Haddii eedeysanaha lagu helo dambi dil ah, waxaa lagu soo oogayaa ugu yaraan cafis la'aan oo muddo 10 sanno ah.

Dambiilayaasha badanaaba wa in ay buuxiyaan shuruudo gaar ah ka dib marka lagu siidaayo cafis. Shuruudahan waxaa gooya Guddiga Cafiska ama garsooraha xukumay dambiilaha. Shuruudahan waxay dabooli kartaa meesha ay ku noolaan karaan, qofka ay la xiriiri karaan, hadii ay qabaan bandow, iyo asbaabo kale oo laga yaabo in ay caawiso badbaadinta bulshada.

### WAXAAD U SHEEGI KARTAA GUDDIGA CAFISKA SIDA AAD U DAREENTAY SIIDEYNTA DAMBIILAHA

Si aad hadal uga jeedisid siideynta dambiilaha xabsiga, waxaad u baahantahay in aad ka diiwaan gashanaatid diiwaanka ogeysiinta dhibanaha si markaas Guddiga Cafiska uu kuula soo xiriiro mar kasta oo dambiilahu uu helayo dhageysi Guddiga Cafiska ah.

Si aad u hubisid faahfaahinta diiwaanka xiriirka in iyaddoo cusub ay ku dhigan tahay diiwaanka, la xiriir booliska, Waaxda Asluubta ama hay'ada taageerkaada.

Waxaad u sheegi kartaa Guddiga Cafiska sida aad dareentay oo qoraal ahaan ah, shirka fiidiyowga ama qof ahaan:

- **Qoraal ahaan ama shirka fiidiyowga.**
  La hadal xiriirka Guddiga Cafiskaada.
- **Qof ahaan ah.**
  Guddiga Cafiska ayaa kula kulmaya. Waxaad lahadleysaa dad la mida kuwa arki doonaa dambiilaha, laakin dhageysiga aad ka qeyb gashay ma noqoneysa xabsi oo dambiilaha meesha ma joogayo. Waxaa kula joogi kara dad ku taageereeyaal marka dhageysiga.

### BAARAHA MAXKAMADDA DAMBIGA

Siiba dacwada maxkamadda, dambi baare ayaa baaraya dacwada waxaana laga yaabaa in ay ka dhacdo dhageysi Maxkamada Baaraha. Tani waa maxkamad gaara oo fiiriso sababaha iyo duruufaha qof dhimashadiisa iyo haddii uu jiro wax kasta oo la qaban karo si looga hortago dhimasho duruufa la mida.

Adeegyada Dambi Baaraha Wasaarada Cadaalada waxay kugu wargelin doontaa adiga dhageysiga ka hor, oo sarkaalkaga isku xiraha booliska iyo dhibanaha ayaa sidoo kale kaala hadli doona wax ku saabsan dacwada dhegaysiga. Adiga iyo qoyskaagu waxaad tagi kartaan dacwada dhegaysiga Baaraha Maxkamadda sida iyo sababta uu qofku u dhintay, laakiin adiga uma baahnid ilaa inta lagu waydiinayo inaad bixiso caddeyn.

Dad taageerayaal ah ayaa kula imaan kara adiga dacwad dhegaysiga Baaraha Maxkamadda sida iyo sababta uu qofku u dhintay. La xiriir Taageerada Dhibanaha 0800 842 846 ama Khadka Macluuumaakda Dhibanayaasha oo 0800 650 654 si aad u diyaarisid shaqsi kugu taageero adiga oo kula abaabulo dhageysiga.

## Xiriirada muhiimka ah

Waxaa jira taageero laguu heli karayo xaalad kasta oo aad kaga jirto nidaamka cadaalada denbiilaha, iyo taageero gaar ah si lagaaga caawiyo sidii aad ula tacaali laheyd saamaynta denbiga.

Halkan waa faahfaahinta xiriirka ee adeegyada qaarkood ee muhiimka ah ee dhibanayaasha iyo dadka dambiyadu saameeyay. Waxaad ka heli kartaa warbixn dheeraad ah oo ku saabsan Khadka Macluuumaakda Dhibanayaasha ee 0800 650 654 (9am ilaa 6pm ka bilow Isniinta ilaa Jimcaha) ama adigoo booqanayo victimsinfo.govt.nz

**ACC**
acc.co.nz
0800 101 996 Khadka-caawinta Sheegashada
0800 735 566 Khadka-caawinta Cabashada Xasaasiga (dhibanayaasha xadgudubka galmada)

**La taliyaasha Dhibanaha Maxkamadda**
0800 650 654 Khadka Macluuumaakda Dhibanayaasha

**Waaxda Asluubta**
04 460 3000
corrections.govt.nz

**Guddiga Cafiska New Zealand**
0800 PAROLE (727 653)
paroleboard.govt.nz

**Taageerada Gaarka ah**
Eeg victimsinfo.govt.nz ama qeybta adeegyada caawinta gaarka ah ee buugga telefoonada

**Booliska**
Waxaad ka heli kartaa saldhiga booliska deegaanka police.govt.nz ama boggaga baluuga ah ee bilowga buugga telefoonada

**Taageerada Dhibanaha**
0800 VICTIM (842 846) 24 saacadood maalintiiba
victimsupport.org.nz

**Hoyga Qaxootiga Dumarka**
0800 REFUGE (733 843) 24 saacadood maalintiiba
womensrefuge.org.nz

**Khadka luuqada** adeegyada turjumaada
0800 656 656
9am–6pm Isniin–Jimco, 9am–2pm Sabti

## Qaamuuska

**Damaanada**
Marka booliis uu siidaayo qof lagu soo eedeeyay dambi oo xaalad ay ku aadeen maxkamada.

**Dambi baaraha Maxkamada**
Dambi baaraha maxkamada ayaa dejiya goorta, goobta, sida iyo sababta dhimashada ay u dhacdo. Waxay sidoo kale ka shaqeeyaan haddii wax walba la sameyn karo oo lagu joojinayo dhimashada noocaas ah.

**La taliyayaasha dhibanaha maxkamadda**
Xubinta shaqaalaha Wasaarada Cadaadala oo sharaxi kara nidaamka maxkamada oo ku wargelin kara dhibanayaasha nidaamka dacwadooda.

**Eedeysanaha**
Qofka lagu soo eedeeyay dambiga.

**Dilka**
Marka qof uu dilo qof kale.

**Dambiilaha**
Qofka lagu xukumay dambiga (Inta aan lagu helin dambiga, qofka lagu soo eedeeyay dambiga waxaa la dhahaa 'eedaysane').

**Cafiska**
Marka dambiile loo ogolaado ka bixitaanka xabsiga si loogu dhameeyan xukunkooda gudaha bulshadda. Waa in ay raacaan sharuudaha gaarka ah.

**Cadaalada heshiisiinta**
Cadaalad heshiisiinta waxay u ogolaaneysaa dhibanayaasha in ay u sheegaan dambiilaha sida ay u saameysay, hadal ka jeediyaan oo sida loo xalin lahaa waxyeelada, oo ay bilaabaan xalinta qaar ka mid ah saameynta dambiga ah. Kulan waxaa la yiraahdaa shirka cadaalada heshiisiinta.

**Dambiga halista ah**
- Dambiga dhaqanka galmada ama weerar kale oo halis ah.
- Dambiga sababay dhaawac halis ah ama dhimasho.
- Dambiga u hogaamiyay dhibanaha in uu lahaado cabsi joogta ah oo amnigooda ah ama amniga mid ama in kabadan oo xubnaha qoyskooda.


**Diiwaanka wergalinta Dhibanaha**
Liiska qarsoodiga ah ee ay isticmaalaan hay'adaha cadaalada dambiga si loola socodsiiyo dhibanayaasha dambiilaha, sida meesha dacwada maxkamaddu ay mareyso, hadii ay jirto ka siideyn kumeel gaar ah oo xabsiga iyo marka dambiilaha lagu soo daayo cafis.

Ka diiwaangeli faahfaahintaada sarkaalka booliska oo masuul ka ah dacwada.

**Warbixinta saamaynta dhibanaha**
Diiwaanka sida dambigu uu usaameeyay dhibanaha. Warbixinta saameynta dhibanaha caadi ahaan waa qoraal, laakin ku dar sawiro, qoraalo ama gabayo. Garsooraha waa in uu tixgeliyaa iyadda marka la xukumayo dambiile. Dhibanaha wuxuu ku akhrin karaa qoraalka maxkamadda ka hor inta aan la xukumin.

## Qolka maxkamadda

Jaantuskan waxuu ku tusayaa hal tusaale oo ah qaabka qolka maxkamadda, iyo qofka aad arki karto.




1. **Garsooraha** ayaa masuul ka ah maxkamadda. Waxay go'aansadaan haddii dambiilaha uu dambi leeyahay, ama haddii ay jirto xeer beegti, xeer beegtiga ayaa go'aan ka gaarayo midaan beddelkii.
2. **Diiwaan geliyahu** wuxuu uu caawiyaa garsooraha oo hubiyaa in nidaamyada maxkamadda la ogolyahay.
3. **Guddiga xeer beegtida** waxay ka koobanyihiin 12 qof oo go'aansado haddii eedeysanaha uu dambiila yahay.
4. **Dacwad oogaha** ayaa qaada dacwada isagoo matalaya Dacwad oogaha oo soo bandhigaa dacwada ka soo horjeedo eedeysanaha.
5. **Warbaahinta** waa joornaaliistayaasha ka warbixiya dacwada.
6. **Qareenka eedeysanaha** wuxuu matalaaa eedeysanaha.
7. **Eedeysanaha** waa qofka lagu soo eedeeyay dambiga.
8. **Waardiyaha maxbuuska** wuxuu raacaa eedeysanaha.
9. **Fadhiga bulshada** waa goobta xubnaha bulshadda iyo qoysaska dhibanayaasha iyo whānau meesha ay fariisan karaan, iyo meesha marqaatiyada ay fariisan karaan markii markhaati ay bixiyaan.
10. **La taliyaha dhibanaha maxkamadda** wuxuu ku caawiyaa markhaatiga fahamka nidaamka maxkamada. Waxaa laga yaabaa in aysan marwalba ku jirin qolka maxkamada.
11. **Markhaatiga qofka taageera** waa qofka uu garsoorahu ogolaaday in uu ku taageeri karo markhaatiga maxkamadda.
12. **Markhaatiga** wuxuu bixiyaa caddaynta ku saabsan waxa dhacay ama waxa ay ka ogyihiin dambiga.